

# NO LITTER *generation*

Wada shaqeyn ka dhaxeysa  
World's Children's Prize Foundation  
iyo Håll Sverige Rent

**Q**ashinku waxa weeye waxyaabaha ku dhaca dhulka ama haraha iyo badda ee aanay aheyn inay halkaas yaalaan. Waxay noqon kartaa dhalooyinka, bacaha wax lagu shubto, daasada, haashka sigaarka ama bacaha nacnaca. Xawayaanka iyo dadkuba way ku dhaawicmi karaan qashinka. Qashinka qaarkiis waxa ku jira waxyaalo khatar ah oo aanay aheyn inay ku daataan dabecada.

## **Wadamada kala duwan – carqalado kala duduwan**

Wadamo badan, ayaan laheyn nidaam wanaagsan oo lagu maareeyo oo lagu kala sooco qashinka. Intooda badan waxa lagu tuuraa dariiqyada ama meelaha gudaafadaha dusha ka furan. Mana jiro hab dib wax looga faa'iideystaa. Inaan laga faa'iideysan qashinka waa khasaarin khayraadka dhulka, maadaama oo qalab badan dib loo isticmaali karo dhowr jeer.

Marka qashinka iyo xashiishka la tuuro iyadoo aan la kantaroolin ayay imaan kartaa, halista caafimaadku. Cudurada waxaa laga yaabaa inay faafaan haddii dadku taabtaan, tusaale ahaan, saxaro iyo irbado. Qashinka waxa ku jiri kara xataa kiimikooyin khatar ah. Laga soo

Qashinku meelkasta ayuu adduunka yaalaa – dhulka, harooyinka iyo badda. Haddii aan waxba laga qaban ayaa 2050 ay jiri doontaa inuu balastigu ka bato kaluunka badda ku jira! Laakiin haddii adiga iyo carruurta kale ee dunida ku nool ayaa wax ka bedeli kara oo noqon kara No Litter Generation (Jiil qashin la'aan ah).

16 maayo ayaynu ka qeyb qaadan karnaa No Litter Day (Maalin qashin la'aan ah) idinkoo qashinka ka guraaya dariiqyada, tuulooyinkiina ama xaafadihiina. Ka dibna ka soo sheega miisaanka dhammaan qashinka aydun wadajir dugsigiina kaga soo gurteen [worldschildrensprize.org/nolitter](http://worldschildrensprize.org/nolitter).


bilaabo wadooyinka iyo meelaha gudaafadaha dusha ka furan ayay ka soo duullaan qashin badan oo ku dhaca harooyinka iyo badda.

Wadamada kale ayaa leh nidaam wanaagsan oo lagu soo ururiyo oo dib looga faa'iideysto qashinka. Laakiin marar badan waxa jira caqabado kale, sida inaanay dadku nidaamka si habboon u isticmaalin ama inay iibsadaan waxyaabo aanay u baahnayn, taasoo keenta qashin badan iyo xashiish. Wadamada kala duwan waxay leeyihiin carqalado kala duduwan.

## **Tusaale ahaan Hindiya**

Qaybo badan oo Hindiya ka mid ah ma jiro nidaam qashinka lagu maareeyo, laakiin gobolka Tamil Nadu, waxa jira kow iyo toban degmo oo soo bandhigay nidaam wanaagsan. Halkaas ayuu qoysku qashinka ku kala saaraa saddex weel.

Qashinka cuntada waxa lagu rideyaa salad cagaar ah. Waxaa lagu soo ururiyaa digo weyn taas oo noqdon doonta carro iyo gaaska dabiiciga. Alaabta dib loo isticmaali karo ama dib looga faa'iideysan karo, sida dhalooyinka caaga ah, gasacadaha biraha iyo warqadda, waxaa lagu ridayaa bac cad. Alaabta waa la kala saaraa, la





# 25 milyan oo maroodibalastig ah ayaa badda ku jira

Waxa laga yaabaa inay badda haddaba ku jiraan 150 milyan oo tan oo qashinka balastiga ah. Waxay taasi u dhigantaa miisaanka 25 milyan oo maroodiyo waaweyn. Iyadoo hadii ay maroodiyadaa waaweyni ay saf galaan iyadoo gacanku fidsan yahay uu dhererkoodu gaadhi karro 200 000 km. Waxay taasi u dhigantaa shan jeer wareega dhulka.

iibiyaa oo dib loogu isticmaalaa siyaabo kala duduwan. Waxaa aan digo laga dhigi karin ama aan dib loo isticmaali karin waxa lagu ridayaa bac madow. Qashinka waa la soo ururiinaayaa, oo la dhigayaa gudaafad dedan, ama waxa loo kaydinaayaa si ammaan.

Waxa sidoo kale Tamil Nadu la isku deyaaya in marka horeba la dhimo qashinka. Tusaale ahaan, Dugsiga Little Flower ayaa dhamaan aagiisa dugsiga ka dhigay meel aan balastig lala soo gali karin iyadoo calaamaduhu ay dadka soo booqda xasuusiyaan mamnuucidda.

## Tusaale ahaan Iswiidhan

Iswiidhan waxay leedahay nidaam lagu maareeyo oo lagu kala sooco qashinka. Joornaalada gaboobey ayaa la soo ururiyaa oo dib loo isticmaalaa si looga sameeyo warqad cusub. Qasaacadaha birta ah iyo dhalooyinka quraaradaha ayaa la dhalaaliyaa, iyadoo alaabta loo isticmaalaa in lagu sameeyo dhalooyin cusub iyo gasaacado. Qeyb ka mid ah balastiga ayaa la isticmaalaa si looga sameeyo balastiga cusub.

Waxyaabaha aan dib loo isticmaali karin ayaa lagu gubaa meelo u khaas ah halkaas oo qiqa gaaska la nadiifiyo oo kulkana lagu isticmaalaa in biyaha loogu kululeeyo gur-

yo badan. Qashinka aan dib loo isticmaali karin ama aan la gubi karin ayaa lagu ridaa gudaafad khaas ah, halkaas oo uu khasaaraha ugu yar ee suurto galka ugu geystaan deegaanka.

Laakiin qaar badan ayaa Iswiidhan iska dhayalsadda inay kala saaraan qashinka ama wax ku tuura meelo qalad ah. Alaab laga faa'iideysan lahaa ayaa markaa ku dhacda xashiishka iyadoo qaarkood ay xashiish ahaan dhulka ugu daataan. Waxa sidoo kale Iswiidhan leedahay qashin aad u badan maxaa yeelay waxa la soo iibsadaa waxyaalo badan iyo baakeedo hal mar uun wax lagu riddo. Si taas wax looga bedelo waa inaynu inagu dad ahaan bedelno caadooyinkeena iyo dabecadaheena.

## Qashinku waa kharash

Waa ay adag tahay in la qiyaaso intuu duniida oo dhan ku taagan yahay kharshaka wasakheyntu. Wadamo badan ayaa awood badan galiya sida loo xaaqaayo ee loo guraa-yo qashinka. Qashinka la daadiyaa waxa uu tusaale ahaan keeni karaa in dalxiisayaashu ay joojiyaan inay safar meel ku aadaan, taas oo u horseedaysa dakhliga soo gala waddanka oo hoos u dhaca. Marba marka uu qashinka dhulka ama badeena ku dhaca uu ka sii bato ayay ka sii darnaan doontaa

dhibaatooyinku iyo kharashyadu. Waxa ka raqiisan in si marka hore wax laga qabto qashinka. Waxyaabo badan oo xataa noqdey qashin ayaa dib loo isticmaali karaa.

## Qashinku waxa uu dhaawacaa xawayaanka

Xawayaan badan ayuu dhaawac gaadhisiiyaa qashinku. Waa ay isku dhaawici karaan, ku dhagi karaan ama ay dhacdaa inay cuni karaan qashinka. Xawayaanka cuna waxyaalaha caaga ah ayaa gaajo u dhiman kara ama caatooba marka calooshooda ay ka

## Balstiga ka badan kaluunka...

Balastiga intiisa badan waxa uu ugu danbeyntii ku dhacayaa badda. Waxay dabeysha, wabiyada iyo biyaha roobka ay geyn karaan meelo fogfog. Haddii aan waxba laga qaban arinkan ayay sandka 2050 ay jiri doontaa inuu balastigu ka bato kaluunka badda ku jira!


## Nibiri ayaa liqay 30 bacood

- 8 milyan oo tan ayaa badda ku dhacaa sanad walba.
- Balastigu waxa uu dhaawacaa 600 oo xawayaan kala duduwan ah oo ku nool bada dhexdeeda ama agteeda.
- boqolkiiba 99 shinbiraha badda ayaa cuni doona balastig sanadka 2050 haddii sida wax ku sii socdaan.
- Nibiri ku soo caariday Noorway ayaa calooshiisa laga helay 30 bacaha waxlagu rito ah.



# 4500 bilyan oo haashka sigaarki waxay gaadhayaan 117 jeer sii socod iyo soo socod dayaxa

Dunida oo dhan waxa dhulka lagu tuuraa qiyaas ahaan 4 500 bilyan oo haash ah sanad walba! Dhamaan haashkaas marka la is garab dhigo waxay noqon doonaan 90 000 000 kiilomitir. Waxa uu dhererkeedu u dhigmaa in 117 jeer sii socod iyo soo socod dayaxa oo la tagey. Waxay qaadataa qiyaas ahaan saddex sanno in uu haashku burburo oo uu noqdo qurubyo yaryar oo aan la arki karin. Laakiin xataa qurubyada yaryar ayaa dhaawac keeni karra. Haashka waxa ku jira waxa ka mid ah balastig iyo kaadmium.



buuxsamaan caag halki ay cunto ka cunni lahaayeen. Xayawaanka yaryar iyo kuwa waaweynba waa uu dhaawici karaa qashinku, sida diinka, kalluunka, shimbiraha, alaalexeyda iyo lo'da.

## Balastigi ma baaba'aayo

Balastiga dhulku ku dhac ama badda gudaheeda gala ayaa si tartiib, tartiib ah ugu googo'aaya. Waxa uu qaadan karaa ilaa boqolaal sanno. Xataa qurubyada aadka u yaryar ee balastiga (waxyaalo aad u yaryar) ayaa dhaawac keeni karra. Waxa qurubyada aadka u yaryar cuni kara noolaha yaryar sida xayawaanka xoolaha iyo alaalexeyda. Marka kadibna kuwaas ay cunaan xawayaanka waaweyn ayaa balastigu raacaa silsilada cuntada. Ugu danbeyn ayaa laga yaabaa in balastigu ku jiro kaluunka aad adigu ku qadeynayo. Cilmi baadhayaasha ayaa isku dayaaya inay ogaadaan saameynta uu dadka iyo xawayaanka u leeyahay balastiga aadka u yarayar.

## Ka shaqeynaaya isbedel

Carruur iyo dad waaweyn oo badan ayaa dunidoo dhan ku dadaalaaya si ay u dhimaan daadinta qashinka.

- Waddamo badan ayaa mamnuucay ama kor u qaaday qiimaha bacaha, sababtoo ah waxay keenayaan dhaawac. Ruwaanda ayaa aheyd wadankii ugu horeeyey ee Afrika mamnuucda bacaha.
- Dalal badan ayaa ka shaqeynaaya inay fududeeyaan si sax ah wax loo sameeyo, tusaale ahaan, in meelaha la dhigo saladaha qashin oo badan oo dabool leh, si aanu qashinku u duulduulin iyo anay uga hagaajinta nidaamka dib uga faa'iideysiga qashinka.
- Warshahada waxsoosaarka, kuwa sameeya baakeedada wax lagu rito, ayaa lagu boorinayaa inay soo saaraan baakeedo ka casrisan, oo aan qashin noqon.
- Wadamo badan ayaa laga sameeyaa olole qashinka lagaga guraayo sida No Litter Day, halkaas oo yar iyo weynba qashinka la wada ururiyo iyadoo lana barto khasaaraha uu keeno qashinku.
- Wadamada ayaa sidoo kale wada shaqeynaaya si ay ugu xaliyaan dhibaataada qashinka. Sanadkii 2015 ayay qaateen dhamaan wadamada ku jira ururka

Qaramada Midoobey 17 hadaf oo horumar waara dhaqaale ahaan, bulsho ahaan iyo bay'ad ahaanba. Hadafka waa in la gaadho sandaka 2030 taas oo suurtoagal ah kaliya hadii la is wada caawiyo. In qashinka laga faa'iideysto, dib loo warshadeeyo oo aan la qubin ayaa ka qeyb qaadanaysa in hadafka la gaadho.

## No Litter Day (Maalin qashin la'aan ah)

Maalinta 16 maayo ama maalin kale oo todobaadkaas ka mid ah, ayaa la soo ururiyaa carruurta wadamo badan jooga, si ay qashinka uga soo qaadaan dugsigooda, degaanadooda ama tuuladooda. Carruurta ka qeyb qaadanayaa waxay ka tirsan yihiin No Litter Generation. Waxay yihiin qaar aduunka isbedel fiican keenaaya, iyo maalintaas gaar ahaan si loo helo adduun ka nadiifsan oo ka caafimaad badan. Waxay kala saaraan oo ay miisamaan qashinka ay soo ururiyeen maalinta No Litter Day. Kadibna wax laga soo wargaliyaa waxa la ururiyey iyo miisaankooda ama qofka lala wadankaaga lagala xidhiidho ama miisaanka No Litter ee laga helo [worldschildrensprize.org/nolitter](http://worldschildrensprize.org/nolitter)



Qashin kala soocista laga sameynaayo St Michael Michael ku yaala Accra, kaas oo ka mid ah Dugsiyada Eco-Ghana.





# Maxay qashinka laga sameyn karaa?

Muraayadaha dib looga faa'ideystaa waxay inta badan noqdaan dhalooyin ama galaasyada wax lagu cabo, laakiin waxa sidoo kale loo isticmaalaa daamur khaas ah oo dariiqyada la dhigo. Waraaqaha iyo karaatoontu waxay noqdaan tusaale ahaan joornaalo, tiishiyuu, warqad wax lagu qorto iyo karaatoonta beedka. Biraha iyo biraha wax dusha ka marsan yihiin ayaa noqdo xadhkaha birta iyo qalabka dhismaha, daasado, farshaxan, kuraas iyo miisas. Looxyada dib looga faa'ideysto waxa laga sameeyaa baaldiyada qashinka, ciyaaraha carruurta, qalabka lagu ciyaaro iyo alaabta guryaha. Caagadaha wax lagu shubto ee PET ayaa la dhalaalin karaa oo lagu isticmaalaa faltarada, barkimooyinka, toobabka iyo marka la kala saaro jaakedada kulul iyo shandadaha lagu seexo. Waxaa galaaya ilaa 10 caaqadood si loo sameeyo dun ku filan hal garan iyo 63 caaqadood si loo sameeyaan funaanad. Miyaad adigu ku haysaa waxyaalaha aad soo jeedinayso oo laga sameyn karro qashinka?



→ Sidan oo kale ayaad adiga iyo asxaabtaadu uga noqon kartaan No Litter Generation:

1. Wax ka barta oo kana wada dooda waxyaalaha ku qoran joornaalka No litter.
2. Ka wada hadla sida goobta aad degan tihiin u noqon karto meel qashin aan laheyn.
3. Guriga u qaado joornaalka No Litter oo u gee qoyska, asxaabta iyo jaarka. Ka wada hadla waxa aad barateen adigoo kala hadlaaya siday uga caawin karaan in dariiqiin ama tuuladiini qashin la'aan u noqon karto.
4. Sameeya maaliintiina No Litter Day oo soo gura, kala saara oo miisaama waxa aad soo gurteen. Ka taxadira si aydaan qashinka naftaada wax u yeelin idinkoo caawimo ka hela qof weyn haddii aad aragtaan wax fiican ama khatar u ah si kale.
5. Soo sheega waxa aad soo ururisay iyo miisaanka guud ee qashinka.
6. Hubiya in dhamaan qashinka dib looga faa'ideysto ama la geeyo meel si amaan ah loogu keydinaayo.
7. U dabaal dega waxqabadkiina!

## Waxa ugu fiican iyo waxa ugu xun ee qashinka

Waxaa ugu fiican haddii aan wax qashin ahiba jirin ugu horeynba. Malaha waxa laga yaabaa in la isticmaalo baakeedo ka yar?

- Wixii qashin ah ee markaa yimaada ayaa dib loo isticmaalayaa ama dib looga faa'ideysanayaa. Markaas ayaa shaygu ama waxyaalahu faa'iido kale yeelanayaa iyadoo khayraadka dhulka la basrinaayo.
- Haddii aanay taasi suurtoagal aheyn waa in qashinka la gubo ama gudaafad xidhan la dhigo. Laakiin waxa weeyaan in taa loo sameeyo si haboon oo aanay hawada, dhulka ama biyahu u wasakheyn
- Ta ugu xun waxa marka uu qashinku dhulka loogu daadiyo xashiish ahaan ama wabiyada, haraha iyo badda.

## WAXAN AYAAD ADIGA IYO ASXAABTAADA NO LITTER GENERATION SAMEYN KARTAAN

Baadhitaan ku samee meesha aad degan tahay:

- Miyuu jiraa nidaam wanaagsan oo lagu maareeyo kala soocida qashinka.
- Maxaad dhibaatooyin idinka haysataan marka laga hadlaayo qashinka iyo xashiishka

Wax soo jeedo oo wax ka bedel:

- Maxaad soo jeedinaysaa si loo dhimo qashin qubista?
- Maxaad xal soo jeedinaysaa si loo maareeyo qashinka iyo xashiishka?
- Ayaa maamula nidaamka qashinka ee meesha aad degan tahay? Waxaad soo jeedisay ogeysii kuwa go'aanka gaadhaaya.
- U sheeg dhamaan dadka jooga meesha aad degan tahay sababta ay qubista qashinku u xun tahay. Ku boori inay caawiyaan in dug-siga, dariiqaha iyo tuulaayinka aanay qashin laheyn oo sii talooyin sida ay u sameynayaan.
- Qorshee sida idinka No Litter Generation uga shaqeyn laheydeen inaad dhintaan qashin qubista xataa marka aanay aheyn No Litter Day.
- Soo ururi fikrado sida dib looga faa'ideysan karro qashinka.
- Dabcan adiguna, qashinka meelaha ha ku tuurin!



Daawo filimka No Litter Generation  
[worldschildrensprize.org/nolitter](http://worldschildrensprize.org/nolitter)





# Qashinku waa qof kasta masuuliyadiisa

**Qeyb weyn taariikhda bini aadamka ayaan qashinku aheyn dhibaato weyn. Qashinka intiisa badan waxa uu ahaa mid dabiici ah, hadhaaga cuntadda iyo qashinka madbakha, kuwaas oo markey qudhma noqdo carro.**

**D**hibaatadu waxay bilaabantey marka ay magaaloyinku sii weynaadeen iyo markeynu helnay alaabaha cusub sida balaastiga. Wey wanaagsan tahay in cunto iyo alaabo lagu keydiyo meel sugan. Laakiin waxay taasi dunida keentey qashin ka badan, oo aan iskii iskaga baaba'eyn. Sidaas daraadeed ayaa wadamo badan dhiseen nidaam lagu maareeyo qashinka. Wadamo badan oo faqiir ah ayaa lacagta waxyaalo kale galiyey. Intaa waxaa dheer, wadamo badan oo hodan ah, iyagoo qaar ka mid ah sharci daro ku sameeyaan, ayay waxay dalalka saboolka ahi u diraan qashinkooda ugu khatarta badan. Kan waxa ka mid ah shaagaga gawaadhida ee rabadhka suntan ah iyo qashinka telefoonada gacata iyo kombiyuuterada. Laakiin taasi hada ma dhacayso. Buuraha qashinka ayaa sii kordhaaya.

## **Marba marka laga sii taajirsanaado ayuu qashinku ka sii bataa**

Marba marka lagasii taajirsanaado, gaar ahaan haddii aad ku nooshahay magaalo, ayuu ka sii badnaanaaya qashinka aad abuuraysaa. Mareykanka iyo Jabaan ayaa ka mid ah kuwa abuuraya qashinka ugu badan, laakiin waa ay awoodaan inay maareeyaan qashinkooda, marka ayaa dariiqadooda qashin ka yar laga arkaa marka la garab dhigo wadamada faqiirka ah, ee iyago sameeya qashinka ugu yar. Halkaas ayaan marna jirin qashin qaadis iyadoo dadku qashinkooda ku daadiyaan dibada. Cudurada ayaa faa'fa. Laakiin way ka sii darnaan laheyd haddii aan qiyaastii rubuc ka mid ah malaayiinkatan ee qashinka iyo xashiishka ee la abuurayo maalin walba aayan ka soo urursadaan dadka saboolka ah, kuwaas oo ah qashin qaata.

## **Qashin qaataha waa loo baahan yahay**

Sidra oo ku nool Pakistan ayaa ka mid ah 15 ka milyan ee dunida ku nool ee qashinka gurta si ay ugu noolaadaan. Iyada iyo Nisha, oo ka soo jeeda qoys labanka sameeya, ayaa ku faraxsan inay ka mid ahaadaan No Litter Generation oo ay ka qeyb qaataa No Litter Day. Waxa ay degan yihiin waddan aan qashin qaadistu ka shaqeyn. Kuwa lacagta haystaa ayaa daadinaaya iyadoo kuwa ugu faqiirsan, ay ka soo gurayaan, kala saarayaan, iibinayaan ama ku beddelanayaan wax ay u baahan yihiin Qoyska Sidra ayaa qashinka guran jirey jiilal badan iyagoo khuburo ku ah dib uga faa'iideysiga iyo dib u isticmaalka. Laakiin waa shaqo adag oo khatar ah oo aan lagac badan laga helayn.

## **Waa lagu guuleystey mudaharaadkii**

Waa xaq darro in dadka qaar ay daadinayaan qashinka kuwa kalena ay ururinayaan qashinka kaliya inay yihiin sabool. In la is nadiifiyo oo qashinka la maareeyo ayaa muhiim ah. Carruurta waa inaanay shaqeynba, waa inay dugsiga aadaan. Hadda ayaa dadka qashinka gura ee dunidoo dhan mudaharaadayaan, sida magaalada hindiya ee Pune. Siyaasiyiinta ayaa xaqiiqdii dhageystay! Waxay balan qaadeen inay lacag siiyaan dadka qashinka gurta oo intooda badan aheyd, shaqadooda.

**Carruurta meesha labenka lagu sameeyo joogta ee Pakistan jooga ayaa ku jira No Litter Generation, siday dhinaca midigta ugu taalo af urduuga.**

Dumarka ayaa bilaabay shirkad wax nadiifisa iyadoo ay imika helaan mushahar, shuruudo shaqo iyo dharka shaqada. Waxay shaqeyaan wakhti ka yar kii hore laakiin waxay helayaan lacag ka badan. Intaa waxa ka sii wanaagsan: Carruurtoodii waxay iska daayeen inay qashinka guraan iyagoo ay bilaabeen dugsiga.

## **La is caawiyo**

Waa qof kasta masuuliyadiisa in dadka dunidoo dhan, gaar ahaan carruurta, ay ku noolaadaan bay'ad sugan oo caafimaad leh. Waxaynu iska caawin karnaa inaynu qashinka gurno oo aynu aqoonta bay'ada fidino. Laakiin hoggaamiyeyaasha dunidu waa inay sidoo kale ilaaliyaan balanqaadyadooda; in loo dagaal galo si loo gaadho Himilada Qaramad Midoobey ee sandaka 2030-ka oo la tirtiro saboolnimada ba'an, la dhimo sinnaan la'aanta iyo cadaalada daradda oo la xalliyo dhibaatoyinka cimilada. Markaas ayaa Nisha iyo Sidra ay iyagu dooran karaan waxay rabaan inay ka shaqeyaan markey weynaadaan.





Nisha, 12  
Fasalka 5, dugsiga-BRIC

# Nisha iyo Sidra waxay ka mid

Galab walba markay dugsiga ka soo laabato ee ay guriga timaado, ayay Nisha sameysaa labenka. Qoyskeedu waa dad deyn lagu leeyahay oo la adoonsado iyadoo Nishina ay ku qasban tahay inay ka caawiso sida deynta lo bixinaayo.

Sidra waxay soo ururisaa qashin marka aanay dugsiga joogin iyadoo kuwaas ka iibisa dadka kala duwan ee iibsanaaya.

Labada hablood ee baakistaan joogaa ayaa iyadoo la soo maraayo barnaamijka World's Children's Prize bartey xuquuqda carruurta. Hadda waxay doonayaan inay ka mid noqdaan *No Litter Generation* ( Jiil qashin la'aan ah) iyo *No Litter Day* (Maalin qashin la'aan ah) 16 maayo iyagoo qashin soo ururiya!



Waxaan maalin walba sameeyaa laba boqol oo laben ah.



Waan garanayaa inay waxbarashadu tahay dariiqa kaliya ee lagu gaadhi karo nolol wanaagsan.



"Waxaanu haddaba sameynay No Litter Day gayagii ugu horeysay."

"Walaashay iyo hooyaday waxay kacaan afarta subaxnimo aroor kasta si ay ilaa fiidka xili danbe u sameeyaan labenka. Hooyo ayaa lacag badan ka deynsatey mulkiilaha warshada labenka si ay ugu daaweyso aabahey. Markaa laga bilaabo waxaanu noqonay adoomo uu mulkiilahu leeyahay.

Dugsiga kadib ayaan cuntada kariyaa. Kadibna waxaan cuntada u geeyaa hooyo iyo walaashay waxaananu shageyaa ilaa habeenkii. Waxaan maalin walba sameeyaa laba boqol oo laben ah.

Mulkiilaha iyo foormaanku si fiican ulama dhaqmaan carruurta. Weyna nagu qeyliyaan oo ay si xun noo dilaan Markaas ayaan xanaaqaa oo aan si ka dhakhso badan u shaqeeyaa. Waxaan ka fikirayaa haddii aan laban badan sameeyo ayaanu awoodi doonaa in aan bixi-no deyntayada oo aanu shaqadan ka xoroobi doonaa.

Habeenka intiisa kale waxaan sameeyaa laylidgeyga. Waxaanu kabo iyo dhar iibsan karnaa kirismaska, laakiin alxamdu lilaah inaanu dugsi aadno. Aad ayaan waxbarashadeyda ugu dadaalaa.

Waxaan doonayaa inaan dhakhtar noqdo oo aan cusbitaal furo. Markaas ayaan hooyadey iyo walaashay u iibin doonaa dhar iyo kabo si aanay ugu sii baahan inay ka shaqeeyaan labanka. Waan garanayaa inay waxbarashadu tahay dariiqa kaliya ee lagu gaadhi karo nolol wanaagsan.

Waxaan bartey inaan xuquuq leeyahay, in dhamaaan anaga iyo carruurtii aanu muhiim nahay iyo in cid kastaa ay ixtirnaanto xuquuqdayada. Halkan ayay dadkoodhan kuligood u arkaan in wiilashu ka muhiimsan yihiin gabdhaha. Taas waa in wax laga bedelo oo gabdhaha la ixtiraamo!"

Waxaan jecelay fikrada aanu anagu nahay No Litter Generation. Qashinku wuu u xun yahay dhamaan dadka iyo xawayaanka. Waxaynu joojin karnaa inaynu qashinka meel kasta ku daadino oo aynu barno dadka waaweyn inay taas joojiyaan. Iyadoo ay xiiso badan tahay in No Litter Day si wada jir ah carruurta wadamada kale loogala qeyb qaato."



"Waxaan miisaamey dhamaan qashinka aanu soo ururinay iyadoo aanu markasta qornay miisaanka."



# hiyiin No Litter Generation



Sidra, 12  
Fasalka 3, dugsiga-BRIC



"Waxay aheyd mucjiso in dugsiga la bilaabo."

"Waxaanu ku dhalanay taandhadan iyadoo aanu safarka noloshayada ku dhameysan doono taandhadan. Dhamaan qoyskeygu waxay soo wada ururiyaan qashinka iyo xashiishka todoba maalmood ee isbuuca. Waxaanu kaas ka iibinaa qofka iibsanaaya iyadoo aanu lacagta cunto ku iibsano.

Waxaan markasta ka fikiraa sababta ay dadku u daadiyaan waxaas oo cunto ah? Laakiin sidaas ayaanu markasta ku helnaa cunto aananu marnaba ka iibsan karneen suuqa. Marmarka qaar ayaanu helnaa alcaab. Alcaabta ugu badan waa ay jajaban yihiin, laakiin anaga way nagu haboon yihiin inaanu ku ciyaarno. Marna ma soo iibsano dhar cusub, waxaanu haysanaa dharka aanu ka helno qashinka uun.

## Mucjiso!

Aroor aan soo toosay ayaa aabahey igu yidhi: 'Maanta ma soo gureysid qashinka ee aad

dugsiga'. Waxay aheyd mucjiso! Marna kama fikirin inaan aadaayo dugsiga xataa riya-deyda. Taasni hore ugama ay dhicin qoyskeyga.

Wax ayaa i dhaawaca. Ardeyda kale ayaa i faquuqay maadaama oo aan ahey waxay ugu yeedheen gabadh reer miyi ah. Ma garanaayo sababta ay dadku noo noceb yihiin. Waxaanu nahay sidooda oo kale! Niyada aan u hayo waxbarashada ayaa keentey inaan u adkeysto taas iyadoo aan bedelkiidii helay asxaab dugsiga iladhigata.

Markaan dugsiga bilaabey ayay dadka kalena bilaabeen inay carruurtooda u diraan dugsiga. Waxbarashada darteed ayaan bulshada ka heli doonaa xushmad. Aad ayaan u sha-qeeyaa si aan ugu noqdo kaaliyaha bulshada, si aan ugu dagaalamo dadkayaga xuquuq-dooda.

Waxaan bartey inaan dha-man carruurtooda xuquuq

leeyihiin. Waxay aheyd dareen cajaa'ib ah. Laakiin halkan waxa loo baahan yahay in dadka waaweyn la barro inay ixtiraamaan xuquuqda hablaha.

Dugsiga kadib ayaan markasta soo ururiyaa qashin iyo xashiish. Markaanu sidaas sameyno ayay dadka kale noola dhaqmaan sidii oo aananu bini-aadan ahayn. Iyadoo kuwa naga iibsanayaa ay na khiyaaman markey qashinka miisaamayaan.

Waxaanu markasta ku nooleyn qashinka agtiisa. Wey wanaagsanaan laheyd meel aan qashin oolin. Laakiin sidee ayaanu markaa lacag u helaynaa? Hasse yeeshee waan faraxsanahay inaan ka mid noqdo No Litter Generation. Waxaanu u baahan nahay inaanu dadka wax ka barno qashinka, in laga fikiro bay'ada oo caadooyinka la bedelo. Wey qurux badnaan doonaan dariiq-yadayadu marka aanu qashinka ka ururino *No Litter Day*."

## Lacagta ka timaada No Litter Day ayaa lagu bixiyaa dugsiga

Nisha iyo asxaabteeda ayaa cid ka iibin doona qashinka ay soo ururiyeen maalinta No Litter Day. Lacagta waxa lagu isticmaalay doonaa kharashka dugsigooda. Lacagta qashinka ay Sidra iyo asxaabteedu soo ururiyaan maalintan ayaa iyana sidoo kale lagu isticmaalaa waxbarashadooda.



## No Litter Generation qashinka ururiya

Nisha iyo asxaabteeda ayaa haddaba ka mid noqdey No Litter Generation, iyadoo halkan ku miisaamayaan qashinka ay soo ururiyaan meesha ay ku nool yihiin iyo labanka.



# NO LITTER day

16 MAY  
MAI MAIO MAYO



جین بلا مہملاٹ

JIL QASHIN LA'AAN AH

स्वच्छ पीढ़ी

کچرے سے پاک نسل

SKRÄPFRI GENERATION

NO LITTER GENERATION

NO  
LITTER  
generation

نسل بدون زباله

GÉNÉRATION SANS DÉCHETS

GENERACIÓN SIN RESIDUOS

نسل بدون کثافات

GERAÇÃO SEM SUJEIRA

फोहोर नफाले दिन

WITH SUPPORT FROM



KEEP SWEDEN TIDY



WITH SUPPORT FROM

